

Su'aalaha Inta badan La iswaydiiyo ee ku saabsan tallaalka COVID-19 ee Carruurta 6 bilood ilaa 5 sanadood

Sababtee carruurta ka yar 5ay u qaataan tallaalka COVID-19?

COVID-19 waxa uu ka dhigaa carruurta kuwa aad u jiran. Tobanaan kun oo carruur ah iyo kuray qabta COVID-19 ayaa cusbitaal la dhigaa, oo COVID dheer ayaa ku dhaca carruurta.

Tallaalku waa qaabka ugu wanaagsan ee naftaada looga ilaaliyo in aad loo jiranaado. Waxay caawisaa ilaalinta carruurta yaryar ee aan awoodin xidhashada maaskaraha ama kala fogaanshaha bulshadda. Tallaalka carruurta sidoo kale waxa uu caawiyaa ilaalinta kuwa la jecel yahay ee khatarta ugu jira inay aad ugu jiranaadaan COVID-19.

Bal ka waran haddii ilmahayga hadda ka hor uu qabay COVID-19?

Carruurta waa in weli la tallaalo, xataa haddii ay hadda ka hor qabeen COVID-19. Dadka si buuxda loo tallaalay waxay helaan ilaalin ka wanaagsan dadka keliya qaaday COVID-19. Haddii ilmahaagu qabo COVID, waa la tallaali karaa si degdega ah markay ka bogsadaan jirada iyo muddadooda go'doominta markay dhammaato.

Haddii aan helo tallaalka COVID-19 muddada uurka, miyuu ilmahaygu weli u baahan yahay in la tallaalo? Bal ka waran haddii aan tallaalnay oo hadda aan naas nuujinayo?

Haa, weli waa inaad tallaasho ilmahaaga haddii lagu tallaalay muddada uurka iyo/ama haddii aad hadda naas nuujinayso. Marka antibodyada la gudbin karo muddada uurka iyo naasnuujinta, ilaalinta way yaraan kartaa muddo ka dib.

Tallaalka COVID-19 badbaado ma u yahay carruurta yaryar? Bal ka waran saamaynta xiliga dheer?

Haa. Badbaadada tallaalka waxaa lagu daraaseeyay 10.000 oo carruur da'aha 6 bilood ilaa 5 sanadood ah. Carruurta qaarkood waxay lahaayeen saamayn degen oo tallaalka ah sida daalka ama qandhada, laakiin tani muddo dheer may gaadhin oo dhammaantood waxay u bogsadeen degdeg. Tallaalka COVID-19 ee carruurta waa nooc tallaalka ah oo loogu yeedho tallaalka mRNA, ee lagu daraaseeyay xawayaanka iyo tijaabooyinka aadamaha sanado badan, oo aan lahayn saamayn xili dheer. Sababtoo ah COVID-19 waxa uu ka dhigi karaa carruurta kuwa jiran, is tallaalidu waa doorashada ugu wanaagsan caafimaadka xiliga dheer iyo badbaadada.

Tallaalka COVID-19 waxtar ma leeyahay?

Haa. Tijaabooyinka caafimaadku waxay muujiyeen carruurta yaryar inuu waxtar leeyahay muddada heerka caabuqa iyo abuurida heerarka la midka ah ee difaaca carruurta sida kurayda iyo dadka waa wayn.

Halkee ilmahayga lagu tallaali karaa?

Haddii ay suuragal tahay, la xidhiidh adeeg bixiyaha daryeelka caafimaadka ilmahaaga si loo qabto ballan. Haddii ilmahaagu aanu lahayn adeeg bixiyaha daryeelka caafimaadka, isticmaal [VaxFinder.mass.gov](https://www.mass.gov/vaxfinder) si aad u hesho ballanta farmasiiga, xarunta caafimaadka, ama goobta kale ee tallaasha ilmahaaga. Tallaalka gudaha guriga waxaa loo heli karaa qof kasta oo dhib ka haysato isticmaalka goobta tallaalka bulshadda.

Baro wax badan oo ku saabsan
mass.gov/CovidVaccineYoungKids



Massachusetts
Department of
Public Health

